

# Wargelinta Bulshada

Farriintan waxaa la soo gelin doonaa onlaynka iyadoo ku qoran af [اللغة العربية](#), [English](#), [Русский](#), [Soomaali](#), [Español](#), [简体中文](#) iyo [Tiếng Việt](#).

---

**Taariikhda:** Juun 15, 2026

**Ku socoto:** Bulshada Qabta Naafanimada Garaadka iyo Korriinka (I/DD)

**Ka socoto:** Xafiiska Adeegyada Naafanimada Korriinka (ODDS)

**Mawduuca:** **Barnaamijka Baahiyaha Qayrucaadiga ah ee Carruurta waa la ballaarinayaa**

Waxaannu haynaa war cusub oo khuseeya barnaamijka Baahiyaha Qayrucaadiga ah ee Carruurta (CEN). Warkaan wuxuu aad muhiim ugu noqon doonaa:

- Waalidiinta iyo masuuliyiinta haysta carruurta ku jirta liiska sugitaanka CEN
- Shaqaalaha barnaamijyada naafada koboceed ee bulshada (CDDPs) iyo Adeegyada Guriga ee Xooggan ee Carruurta.

## Waa maxay waxyaabaha cusub?

Waxaannu kordhinaynaa tirada carruurta ee barnaamijka CEN u adeego. Hadda wuxuu u adeegaa 155 carruur ah markiiba. Laga bilaabo Luulyo 1, 2026, barnaamijku wuxuu awood u yeelan doonaa inuu u adeego 230 carruur ah markiiba. Tani waxay ka dhigan tahay in 75 ilmo oo kale ay awoodi doonaan inay ku soo biiraan barnaamijkan.

[Barnaamijka CEN](#) waxa loogu talagalay carruurta ka yar 18 jir kuwaasi oo qaba baahiyo caafimaad ama habdhaqan oo aad u sarreeya. Waalidiinta iyo masuuliyiinta ayaa lacag lagu siiyaa inay daryeel siiyaan ilmahooda.

## Sababma ayuu isbaddalkani u dhacayaa?

Barnaamijku wuxuu bilaabmay Lulyo 1, 2024. Sharci-dejinta Oregon ayaa siisay barnaamijka miisaaniyad xaddidan. Marka la eego miisaaniyaddaas, waxaanu qiyaasnay in barnaamijku uu taageeri karo 155 ilmo markiiba.

Qiyaastii 15 bilood kadib markii barnaamijku bilawday, waxaanu haynay xog ku filan lafaguridda isticmaalka adeegga barnaamijka. Celceliska kharashka ilmihiiiba waa ka hooseeyey intii la filayey. Ilaa markaas, xogtu wali waxay taageeraysay natiijadan. Taasi waa sababta aanu u ballaarin karno barnaamijka si uu u taageero carruur badan iyadoo aan miisaaniyadda waxba lagu darin.

Miisaaniyaddiisa oo xaddidan darteed, barnaamijku wuxuu leeyahay liis sugitaan oo dheer. Waanu ka garaabaynaa sida ay u adag tahay in la sugo adeeggan. Waxaannu sii wadi doonnaa inaannu lafagurno xogta barnaamijka si aanu sida ugu fiican uga faa'idaysanno miisaaniyaddiisa.

## **Miyey wax iska beddeli doonaan carruurta ku jirta barnaamijka?**

Maya. Adeegyada barnaamijka sidooda ayay sii ahaan.

## **Miyuu habka liiska sugitaanku u shaqeeyaa isbeddeli doonaa?**

Maya. Hannaanka iyo nidaamka liiska sugitaanku sidooda ayaa sii ahaan.

## **Maxaa xiga oo dhici kara?**

Muddo yar kadib Lulyo 1, 2026, waxaannu u diri doonnaa waraaq qoraal ah qoysaska 75 carruur ah ee xiga ee liiska sugitaanka. Waraaqdu waxay sharrixi doontaa tallaabooyinka xiga.

Waxaannu cusboonaysiin doonaa oggolaanshaha CEN si uu ugu adeego 230 carruur ah markiiba.

## **Sidee ayaan u bixin karaa jawaabcelin ama wax badan uga ogaan karaa barnaamijka CEN?**

- Noo sheeg sidaad u aragto isbeddelkan. Noogu soo dir iimeyl [odds.waivers@odhsoha.oregon.gov](mailto:odds.waivers@odhsoha.oregon.gov).
- [Booqo webbeejka barnaamijka](#).
- Iimeyl ugu dir hawlwadeenada CEN [cenprogram@odhs.oregon.gov](mailto:cenprogram@odhs.oregon.gov).
- La hadal isku-duwaha adeegyadaada.

Waad ku mahadsan tahay inaad nagala shaqayso inaanu ku taageerno carruur dheeraad ah barnaamijkan.

### [Xafiiska Adeegyada Naafada Korriinka](#)

Waaxda Adeegyada Dadweynaha ee Oregon

---

Waxaad dukumintigaan ku heli kartaa si bilaash ah isagoo ku qoran luuqado kale, far waawayn, qoraalka indhoolayaasha ama qaabka aad ku dooneyso. Iimayl ku soo dir [dd.directorsoffice@odhs.oregon.gov](mailto:dd.directorsoffice@odhs.oregon.gov) ama wac 503-945-5811. Waxaan aqbalnaa dhammaan wicitaanada dadka maqalku ku adag yahay.

### **Khayraadka**

- Isku diiwaangeli [wargelinada ODDS](#).
- Wax ka ogow [dhacdooyinka ODDS](#).
- Isku diiwaangeli [wargelinada Waaxda Adeegyada Aadanaha ee Oregon](#).
- Akhri [farriimo ka socdo ODDS](#).
- Naga soo raac [Facebook @oregondhs.idd](#)